

INTERNATIONALE WOCHEN GEGEN RASSISMUS

16.-29. März 2020



© @mentatigt / Pexels

USBUUCYADA CAALAMIGA AH EE
KA HORTAGGA ASSALSOOCA 2020

Usbuucyada caalamiga ah ee ka hortagga Assalsooca 16. -29. Maarso 2020

21. Maarso waa »maalinta caalamiga ah ee tirtiridda takooridda asalka ku saleysan« ee qaramada midoobay waxeyna xasuusineysaa »xasuuqii Sharpeville«, ee booliska koofur Afrika 21. kii Maarso 1960 farasmagaalaha Sharpeville 69 qof oo si nabad ah u banaanbaxaya ku toogteen.

Wadanka Jarmalka iyo Yurub oo dhan waxaa sannad walba lagu qabtaa kumanyaal kulamo iyo isu-soobaxyo ah inta lagu jiro usbuucyada caalamiga ah ee ka hortagga Assalsooca, kuwaas oo lagu muujinayo diidmada Assalsooca laguna xoojinaayo bulsho furfuran oo nabad ku wada nool.

Assalsoocu waa wejijo badanyahay

- **Assalsoocu kuma saabsana oo kaliya halka qofku ka soo jeedo iyo midabkiisa uun** ... ee wuxuu ku saabsanaan karaa diidmada diin, dhaqan, aragtida guud, aragtida dhedig iyo lab, cuuryaannimada amaba da'ada.
- **Assalsoocu ma ahan wax aad u fog oo lama arkaan ah oo meel kale uun ka dhaca.** ... ee waa dhacdo joogto ah oo agteena ka dhacda Jarmal iyo Yurubba.
- **Assalsooc ma sameeyaan »kuwa kale« kaligood** ... ee xataa annaga lafteenna ayaanan ka madaxbannaaneyn sii-xukumid iyo takooridda dadka kale iyo kooxahaba.

Gefördert durch:



Bundesministerium
des Innern, für Bau
und Heimat

aufgrund eines Beschlusses
des Deutschen Bundestages

Gefördert durch:



Die Beauftragte der Bundesregierung
für Migration, Flüchtlinge und
Integration

aufgrund eines Beschlusses
des Deutschen Bundestages

Assalsooc waa joogto meel kasta

- Nin madow ayaa loo diiday kamidnoqoshada xarumaha jirdhiska (Fitness-Studio),
- Tartame leh magac ajnabi ayaa loo diiday in uu helo ballantii uu guriga ku soo fiirsan lahaa,
- Gabar muslimad ah oo madaxeeda daboolan dartiis loogu diiday shaqada.

Assalsoocu aad ayuu dhaawac u geystaa

- Dulmanaha Assalsooc lagu sameeyay looma fiiriyo shakhsi ahaan ee waxaa loo fiirinayaa koox ahaan (»kuwii madoobaaya«, »kuwii Yuhuuda ahaay«, »kuwii muslimka ahaay«, »kuwii Sigoynaha ahaay«).
- Si toos ah ayaa loogu arkaa in eysan ka tirsanayn bulshada oo eysan la socon karin si la siman kuwa kale oo waa la gooni yeelayaa.
- Waxaana dambi looga dhigayaa qaabkooda iyo dhaqankooda in ey ku keensadeen in la takooro.

Ka hortag Assalsooc si dhab ah

Dadaal kasta oo shakhsi wax badan ayuu faa'iideeynayaa bedelina karayaa! Ka faa'iideeyso fursadaha kala duwan ee jira, ee looga hortago Assalsooca iyo Takoorka si dhab ah.

Übersetzt von Halima – Aktiv für Afrika e.V.

Haddii aad u baantahay wargelin intaan ka badan ama wax dalbaneysid nala soo xiriir:

- Stiftung für die Internationalen Wochen gegen Rassismus
Goebelstr. 21a, 64293 Darmstadt
Telefon 06151 / 33 99 71, Fax 06151 / 39 19 740
info@stiftung-gegen-rassismus.de
stiftung-gegen-rassismus.de



STIFTUNG
für die Internationalen Wochen
GENEN RASSISMUS